## Maxaa Dhacaya Markaad Codsato Dhegaysi?

- Koox waxay codsan kartaa dhagaysi marka wakaalada gobolku isku daydo in ay maamusho hawl, diido. Beddesho, ama soo af jarto dheefaha ama adeegyada. Dhagaysiga waxaa qabta garsoore madaxbanaan oon cid u eexan oo jooga Xafiiska Dhegaysiga Maamuleed (OAH).

**U sheeg OAH isla markaaba haddii Cinwaankaaga ama telefoonku isbeddelo.**

- Xaalado badan, OAH waxay boosta kuugu soo diri Ogaysiiska Shirka Dhagaysiga ka hor oo leh taariikj, wakhti, iyo goobta shirkaaga dhegaysiga ka hor. Celcelis ahaan, dhegaysigu waxa uu dhammaadaa 30 miridh. (Qorshee ilaa 90 miridh.)

- Waxaad wakiil ka noqon kartaa naftaada shirka dhagaysiga hortii ama dhagaysiga, ama waxaad dooran kartaa qareen ama qof kale oo kaa wakiil noqda adiga. Ogaysiisku waxa uu sheegi doonaa haddii aad isticmaali karto wakiil aan qareen ahayn. (Ma isticmaali doontid shaqaalaha wakaalada) Waxaad masuul ka tahay wixii kharash ah ee uu soo dalacdo qareenkaagu.

- Wakaalada gobolka waxaa wakiil ka noqon kara xeer ilaaliyaha, shaqaale qareen ama shaqaale.

- Haddii aad u baahantahay turjubaan, OAH waxay kugu siin doontaa adiga kharash la'aan. Haddii aad naafo tahay waxaad codsan kartaa hoy si ay kaaga caawiso in aad ka qayb gasho dhagaysiga. Waxaad codsan kartaa turjubaan ama hoy adoo wacaya xafiiska OAH ogaysiiskaaga.

- Haddii aad u baahanahay in aad codsato beddel wakhtiga ama taariikhda shirka dhegaysiga ka hor, la xidhiidh wakiilka wakaalada gobolka iyo OAH sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Garsooraha oo keliya ayaa ku siin kara beddelka jadwalka. Go'aanka ka hor intaan la gaadhin, garsoorahu waxa uu dooni doonaa in uu ogaado haddii wakaalada gobolku ay aqbalaan ama khilaafaan codsigaaga.
    - Garsooruhu wuu diidi karaa codsigaaga haddii aanad haysan sabab wanaagsan.
    - Haddii garsoorahu uu beddelo wakhtiga jadwalka dhagaysiga. Hayso warqaddaha si aad ugu isticmaasho muddada dib jadwal ugu samaynta dhegaysiga.

**Waxaad yeelan kartaa 2 kullan oo jadwal looga sameeyay garsooraha:**

- **Shirka Dhagaysiga ka hor**
- **Dhagaysi**

**Waxaad ku heli doontaa Ogaysiis boostadda ka hor mid kasta.**

## Shirka Dhagaysiga ka hor

- Raac tilmaamaha ku yaala Shirka Ogaysiiska Dhagaysiga ka Hor. Haddii aad ka qayb geli waydo, waxaad lumin doontaa xaqaaqa dhegaysiga.
    - Ogaysiisku waxa uu ku fari doonaa in aad bixiso telefoon lambarka halka lagaala soo xidhiidhi karo. Ogaysiiska waxa uu ku siin doonaa lambarka telefoonka lagaala soo xidhiidhi karo.
    - Waa in aad leedahay maqal telefoon oo wanaagsan. Haddii aad bixisay lambar telefoon lagaala soo xidhiidhi karo shirka, telefoonkaagu waa in uu awood u yeeshaa in uu helo wicitaanadaaan lambarka la arki karin.

- Garsoorahu waxa uu bilaabi doonaa la aqoonsashada arrimaha kooxaha iyo qiimaynta qadarka wakhtiga loo baahanyahay dhegaysiga. Garsoorahu waxa uu faahfaahin doonaa waxa dhici doonaa muddada dhagaysiga, iyo kooxda soo bandhigi doonta caddaynta ugu horayn.
    - Garsoorahu waxa uu dejin doonaa taariikhaha lagu wado iyo jadwalka dhegaysiga.
    - Ka dib shirka dhagaysiga ka hor garsoorahu waxa uu boostada kuugu soo diri doonaa Amarka Dhagaysiga ka hor iyo Ogaysiiska Dhagaysiga.

- Haddii aad danaynayso samaynta daraasad sharci ah, linkiyada waxa laga heli karaa www.oah.wa.gov/LegalResearch.shtml iyo **www.washingtonlawhelp.org**.

**Ka daawo fiidyowga tusaale dhagaysiga OAH**
**www.oah.wa.gov**
(lagu heli karo Af Ingiriisi io Isbaanish)

- Halkan waxaa ah ikhtiyaarada qiimaha la dhimay ee caawimadda sharci:

| **Magaca Isha** | **Lambarka Telefoonka** | **Barta Internatka** |
|---|---|---|
| SAAFI: Gudaha Degmadda King<br>SAAFI: Dibadda Degmadda King | Wac 211<br>888-201-1014 | www.resourcehouse.com/win211 |
| Mashruuca Ruugcaddaaga | 855-657-8387 | iyo http://nwjustice.org/veterans. |
| Ururka Wakiiladda Qareenada ee WA | | http://www.wsba.org/Resources-and-Services/Find-Legal-Help |

**Waxaad la xidhidhi kartaa  wakiilka wakaalada gobolka haddii aad jeclaan lahayd in aad dejiso kiis dhagaysiga ka hor, ama aad hayso su'aalo ku saabsan sharciyada.  Wakiilku kuma siin karo talo sharci.**

## Sida loo Diyaariyo Dhagaysigaaga

- Si feejigan u akhri Amarka Dhagaysiga ka hor iyo Ogaysiiska Dhagaysiga.
- Soo ururi warqaddaha aad doonayso in garsoorahu uu arko:  Tusaalooyinka warqaddaha aad doonayso in garsoorahu uu arko:
    - Warqaddaha muujiya cabashadaadu waa sax.
    - Warqaddaha ay wakaalada gobolku kuu sheegtay in aad u baahantahay in aad tusto garsooraha.
    - Caddaynta gaarka ah ama duruufaha maaliyadeed ee aad doonayso in laga fekero.
- Ka feker haddii ad haysan doonto wax markhaati ah oo marag fura.   Amarka Dhagaysiga ka hor waxa uu u aahan karaa adigu in aad soo gudbiso liiska markhaatiga aqoonsanaya markhaati kasta oo si kooban u sharax caddayntooda.
- Raac taariikhaha lagu wado Amarka.  Haddii aad seegto taariikhaha lagu wado oo aad ku guul daraysato in aad soo gudbiso liiskaaga markhaatiga iyo tusmooyinka ( warqaddaha), ama in aad calaamadiso oo soo gudbiso tusmooyinka, waxaad ku xaddidnaan kartaa caddaynta aad isticmaali karto dhagaysiga.

## Sida looga Qayb galo Dhagaysigaaga

- **Dhagaysiga Telefoonka**   Raac tilmaamaha ku yaala Ogaysiiska Dhagaysiga.  Haddii aad iman waydo oo ka qayb geli waydo, waxaad lumin doontaa xaqaaqa dhegaysiga.
    - Ogaysiisku waxa uu ku fari doonaa in aad bixiso telefoon lambarka halka lagaala soo xidhiidhi karo.  Ogaysiiska waxa uu ku siin doonaa lambarka telefoonka lagaala soo xidhiidhi karo.
    - Waa in aad leedahay maqal telefoon oo wanaagsan.
    - Fadlan ogow waa in aad awood u yeelaataa in aad wicitaanada ka maqasho telefoonka ka xidhan araga lambarka ku soo waca.

- **Dhagaysiga Shakhsi ahaan:**  Aad goobta dhagaysiga ugu yaraan 10 miridh horteed.  Tus Ogaysiiskaaga soo dhoweeyaha.  Haddii aad iman waydo oo ka qayb geli waydo, waxaad lumin doontaa xaqaaqa dhegaysiga.
    - U soo qaado warqaddahaaga dhagaysiga

- Haddii aad qorshaynaso isticmaalka markhaati, waxay caddayn bixin doonaan muddada wakhtiga dhegaysigaaga jadwalka leh.  U sheeg markhaatiga wakhtiga iyo taariikhda dhagaysiga iyo sida looga qayb galayo.
    - Markhaatigu waxa uu raaci doonaa tilmaamo la mid ah Ogaysiiska ( bixita lambar telefoon halkaas oo lagala xidhiidhi karo, iyaddoo la isticmaalayo summada wicitaanka, ama tegista goobta dhagaysiga).
    - Haddii ay telefoon kaga qayb galaan, u sheeg markhaatiga telefoonkoodu in uu leeyahay maqal wanaagsan oo telefoonkooda wax laga maqli karo telefoonka ka xidhan araga lambarka ku soo waca. Hayso lambarka lagala xidhiidhi karp markhaatigaaga.

- Garsoorahu  ama weriyaha maxkamaddu waxa uu duubi doonaa dhegaysiga.  Garsoorahu waxa uun sidoo kale falanqayn doonaa warqaddaha la helay oo waxa uu go'aamin doonaa warqadda kuwa (muujiya) si loo ogoaado caddayn.

- Koox kastaa waxay waci kartaa markhaatigooda oo waxay  su'aali markhaatiga ay waceen kooxaha kale.  Markhaatigu waxa  uu ku marag furaa dhaar ama bayaan.  Garsoorahu sidoo kale waxa uu waydiin karaa su'aalo.

- Dhegaysiga ka dib garsoorahu waxa uu gaadhi doonaa go'aan boostada ay OAH kuugu soo diri doono adiga. Tilmaamaha rafcaan ka qaadashada go'aanka waxay ka muuqan doonaan dhammaadka amarka garsooraha.